

Sheekada Ka Dambeyisa Fikradda


Dhaqdhaqaaqa Caalamiga ee Laanqeyrta Cas iyo
Bisha Cas laga soo bilaabo 1859 ilaa hadda



Sheekada Ka Dambeyisa Fikradda

Dhaqdhaqaaqa Caalamiga ee Laanqeyrta Cas iyo Bisha Cas laga soo bilaabo 1859 ilaa hadda

DAGAAL KHARAAR AYAA WUXUU CIIDAMADII TALYAANIGA IYO USTREYANKA KU DHEXMAREY TUULADA SOLFERINO EE WAQOYIGA TALYAANIGA 24KII JUUN 1859. UGU DAMBEYNTII, UGU YARAAN 40,000 ASKARI AYAA DHIMATAY, DHAAWACOODUNA DHULKA AYUU DAAPSANAA, LOOGANA TAGAY GOOBAHA DAGAALKA. SHAQAALAHA CAAFIMAADKANA WAA AWOODI WAAYEEN INAY HOWSHOODA QABSADAAN. MANA AYSAN HAYSAN DHOWRIS QAAS AH.



WAA ARIN NAXDIN LEH!

WAXBA LAGAMA QABAN KARO, DAGAALKUNA WAA SIDAASI.

HENRY DUNANT OO AHAAN GANACSADAH SWISS AH OO KU SAFRAYEY GOOBTAAZI AYAA SOO GAARAY SOLFERINO SAACADO KA DIB DAGAALKA. WAXAA CALOOL XUMEEYAY WAXYAABIHII UUU ARKAY.



DUNANT WUXUU AGAASIMAY GARGAARKA DEG DEGGA AH, ISAGOO DADKA DEGAANKA KA DHAADHICIYEY INAY XANAANEYYAAN DHAMMAAN DHAAWACYADA, HA AHAADAAN FARANSIIS AMA USTERIYAAN.

DHAMAANTEEN WAXAN NAHAY WALAALO DHIBAATEYSAN.



TANI MAXAY IDINKA DHIGAN TAHAY?



WAAN GUULEYSANEY, ADIGANA WAXAAD CAAWINEYSAA CADOWGEENA, TAASI WAA QIYAANO QARAN, MUDANE!

AAN KUU SHARXO, TALIYE.

??!!!



SIDEE DOONEYSAA INAAD KU HESHAAN ALAABTA DHAYIDA IYO DAWOYINKA KALE EE AAD U BAAHAN DOONTAAN?

WAXAN DIYAAR U AHAY INAAN ANIGA QARASHKA BIXIYO BALSE WAXAA JIRA WAXYAABO AAD SAMEYN KARTO



HADAL! MAXAAD U BAAHAN TAHAY?

SOO DAA TAKHAATIIRTA USTREIYANKA AH IYO SHAQAALAHA CAAFIMADKA, KUWA QALLIINKA EE AAD MAXAABIS AHAANTA U HEYSATO, IINA SOO DIR ANIGA!


HAA, MA INTAASAA HADALKU?!? WAAD KU DHIIRAN TAHAY COSDSIGAAGA, DUNANT! FIKIR XUN MA AHAN. LAAKIIN, WAAN EEGI DOONAA WAXAN QABAN KARO.

MAHADSANIN TALIYE, DHAAWACYADA KELIYA AYAAN KA TAXADARAYAA.

MARKUU KU LAABTAY JINEFA, DUNANT MA UUSAN ILOOWIN WAXYAABIHII UUN SOO ARKEY. SANADKII 1862, WUXUU DAABACAY XUSUUSTII SOLFARINO. BUUGGU WUXUU SOO BANDHIGEY LABO FIKRADOOD OO WAAWEYN:




NINKU WAA RIYOODE




MAYA! WUU SAXANYAHAY. WAA IN WAX UUN LA SAMEEYAA.

SANADKII 1863, DUNANT IYO AFAR KALE OO REER JINEFA AH AYAA AAS AASEY GUDDIGA CAALAMIGA EE LAANQEYRTA CAS (ICRC).



- (1) TANI WAXAY SABABTAY AAS AASKA URURADA QARAMEED EE LAANQEYRTA CAS IYO BISHA CAS.
- (2) WAXA KALOO SALDHIG U NOQOTAY XEERKA CAALAMIGA EE AADAMINIMADA.



TANI WAXAY NOQON DOONTAA ASTAAN CAALAMI AH, SI LOO DHOWRO SHAQAALAHA CAAFIMAADKA EE CIIDANKA GOOFTA DAGAALKA.

SIDAA DARTEED, LAMA SOO WEERARI DOONO.

DHAMMAAN DHAWACYADA WAA IN AY HELAAN DAWEYN DHINAC KASTOOY KA TIRSAN YIHIIN!

1864: "AXDIGII WANAAJINTA XAALADAHAA DHAAWACYADA CIIDANKA EE GOOFTA DAGAALKA" AYAA LA ANSIXIYEEY.



SANADKII 1876, TURKIGA WUXUU GO'AANSADAY INUU IISTICMAALO BISHA CAS IYADOO LA TIXGELINAYO DHAQANKA.



SANADKII 1901, HENRY DUNANT AYAA LA SIIYEEY ABAALMARINTA NABADA EE NOBEL.

TIRADA COLAADAHAA AYAA SI KORDHAYSA, TAASOO MUJISAY MUHIMADDA FIKIRKIISA AASAASIGA AH SI LOO HELO WAX UUN AADAMINIMO AH

XEERAR QORAN OO KU SAABSAN QAABABKA DAGAALKA AYAA BILOWDEY INAY SOO BAXAAN. SHIRKII 1907 EE HAGUE WUXU MAMNUUCAY ADEEGSIGA HUBKA SUNTA AH IYO DILKA ASKARTA ISA SOO DHIIBTA.



WAXA JIRAY 42 URURO QARAMEED OO SHAQEYNAYA WAGTIGII DAGAALKII KOWAAD EE ADDUUNKA (1914-1918).





WAAGII DAGAALKII KOWAAD EE ADDUUNKA, WARSHADAH CASRIGA AH WAXAY AWOODEEN IN AY SOO SAARAAN HUB AAD U BADAN OO LAGU GUMAADAY MALAAYIIN QOFOOD; CIIDAN IYO SHACAB. GAASKA AYAA SI BAAHSAN LOO ISTICMAALEY.




QAAR KA TIRSAN MUTADAWICIINTA AYAA KA SHAQEYNA AAGGA HORE.

KUWO KALENA WAXAY URURIYEEN BUNDADAH DHARKA, RAASHINKA, TUBAAKADA, MURAAADAH INDHAHA AMA DAAWOYINKA.



IYADO AY JIRAN JID-GOYOYIIN IYO FURIMO DAGAAL.



ICRC-DA WAXAY MAXAABIISTA DAGAALKA U QEYBISAY MALAAYIIN WARAAQO IYO BUNDADO.



DAGAALKU WUXU DHAMADAY 1918 LAKIIN WAXA LAGA DHAXLEY CAAFIMAAD DARO.

XUMADDA ISBANISHKA AYAA DISHAY IN KA BADAN INTII KU DHIMATAY AFAR SANO UU DAGAALKU SOCDEY!




SANADKII 1919, URUR QARAMEEDYADII WAXAY SAMAYSTEEN URUR-WEYNE XIRIIRIYA HOWLAHOODA.

WAA INAN XANNAANEYNO BARAKACAYAASHA!

... LA DAGALANAA ABAARTA!...

... CUDURRADA FAAFA! ...

... DIB U DHISNAA XARUMAHA CAAFIMAADKA!...



DHAQDHAQAAGA WUXUU NOQDEY MID CAALAMI AH.

COLAADO CUSUB AYAA KA DILAACAY ISBEEYN, ITOOBIYA IYO SHIINAHA, SHACABKA AYA SI JOOGTO AH LOO BEEGSADEY.



COLAADAHAN WAXAY SAADAALIYEEN BURBURKII WEYNA A E E DAGAALKII LABAAD EE ADDUUNKA (1939-1945).

MAXAABIISTA DAGAALKA WAXAY HELEEN IN KA BADAN 36 MILYAN OO BUNDADOOD IYO 120 MILYAN WARGADOOD.



SARAAKIISHA ICRCDA WAXAY BOOQDEEN XEROOYINKOODA MAXAABIISTA DAGAALKA SI AY U XAQIJIYAAN IN LOOLA DHAQMO SI WAFAQSAN AXDIGII JINEEFA EE 1929.



BALSE CIDINA MA JOOJIN DILALKII ULA KACA AHA A E E MALAAAYIIN QOFOOD, GAAR AHAAN YUHUUDA; DUNIDU WAXAY GAARTEY HEER WAXASHNIMO OO CUSUB....



SANADKII 1949, DOWLADUHU WAXAY DIB U EEGIS KU SAMEEYEN XEERARKII IYO HESHIISYADA AADAMINIMO EE WAAGAASI JIREY, WAXAYNA ANSIXIYEEN KUWO CUSUB SI LOO DIFAACO SHACABKA WAQTIYADA COLAADAHA. KUWASINA WAA AFARTA AXDI EE JINEEFA EE HADDA LA ADEEGSADO.

DAGAALADU XAD BEEY LEEYIHIN



XEERKA CAALAMIGA EE AADAMINIMADA WUXU KU SALAYASAN YAHAY LABO FIKRADOOD AASAASI AH:





1 DADKA AAN DAGAALKA KU JIRIN WAA IN LA DHOWRAA.

2 NOOCA HUBKA IYO HABKA DAGAALKA WAA XADIDAN YIHIIN.



SANADKII 1977, LABO KAABAYAAL AYAA LAGU DAREY AXDIYADII JINEFA, MID SEDDEXAADNA WAXAA LAGU DAREY 2005, WAXAYNA U OGOLAANAYAA URURADA LAANQEYRTA CAS IYO BISHA CAS ISTICMAALKA ASTAANTA HOOS KA MUUQATA: KIRISTALKA CAS.





ICRC WAXAY DIFAACDAA, CAAWISAA DHIIBNAYAASHA DAGAALKA.

HADDII DAGAALYAHAN IS DHIIBO, WAA IN SI IXTIRAAM LEH LOOLA DHAQMAA

.... UNA QEEQ DAGAALYAHANNO OO DHAN SHURUUDA AY TAHAY IN AY KU DHAQMAN.



DHIIBNAYAASHA DAGAALADU WAXAY HELAAN CUNOYIN IYO WAXYAABAHA KALE AY U BAAHAN YIHIIN SI AY U NOOLAADAAN.

WAXA YAALLA WAX KU FILAN QOFKA KASTA!




WAXAN MAQLAY IN QAAR KA TIRSAN DAGAAL YAHANADAADA AY GUBEEN TUULO KU AG TAAL WABIGA.

WAX BAAN KA QABANEYNAA CID KASTA OO KA DAMBEYSA



KOOXAHA CAAFIMAADKA WAXAY WAX KA QABTAAN DHAAWACYADA AAGA DAGAALKA.



SARAAKIISHA URURKA WAXAY QODEEN CEELASHA



.... WAXAY TALLAALEEN XOOLAHA

XARUMAHA DHAQANCELINTA NAAFADA WAXAY WAX U QABTAAN DADKA AY MIINOYINKA ADIMUHU TIREEN.


QOYSASKA KU KALA LUMEY DAGAALADA WAXAY ISTICMAALAN TELEFOONADA DAYAX GACMEEDKA AMA WAXAY QORAAN FARIIMAHA LAANGEYRTA CAS SI AY ULA XIRIIRAAN QOYSASKOODA.



WAAN ARKAA, WAAD SAMEYN KARTAA!



XUSUUSNOOW IN AY REEBAN YIHIIN JIR-DILKA IYO SI XUN ULA MACAAMILKA



UGU DAMBEYNTII! WAAN IS HELNEY!

ICRCDU WAXAY BAADIGOOBTA DADKA LA LA' YAHAY WAXAYNA DIB ULA MIDEYSAA QOYSASKOODA

WAQTIYADA COLAADAHA, ICRCDA WAXAY HUBISAA IN ASKARTA DAGAALADA LAGU QABTO IYO MAXABIISTA RAYID AH JIR AHAAN IYO MASKAX AHAANBA LA IXTIRAAMO.



MEELAHA AY MUHIIM TAHAY, SARAAKIISHA WAXAY ISKU DAYAAN IN AY HORUMARIYAAN XAALADDA XABSIYADA.

TANI WAA SIDA AAN DOONAYNO IN AAN U DAYACTIRNO QOLALKA MAXAABIISTA.

IYADOO KU SHAQEYNAYSA DHEXDHEXAADNIMO, ICRC-DA WAXAY DIB U CELIN KARTAA MAXAABISTA DAGAALKA IYO KUWA RAYIDKA AH MARKA AY COLAADDU DHAMAATO.




ICRC AHAAN, MUTADAWICIINTA JAMCIYAD QARAMEEDYADA DOOR MUHIIM AH AYEY QAATAAN, SABABTO AH WAXAY GARANAYAAN XAALADA DHABTA AH GOOFTA. MARKA AY COLAADDU GAARTO HALKA UGU SAREEYA, WAA KUWA KELIYA EE GAARI KARA Dhibanayaasha.



WAXA JIRA WAXYAABO KALE OO DAGAALKA KA DARAN. MASIIBOYINKA DABIICIGA AH AYAA SAAMEEYA MALAAYIIN QOFOOD SANAD KASTA.


ISBEDELKA CIMILADU WUXU SII XUMEEYAA RAADADKA ABAARAH, DUUFANADA IYO DAADADKA.

.... OO AY KU JIRAAN DHUL GARIIRADA



DAD BADANI MA GARANAYAAN SHURUCDA AAS AASIGA AH EE NADAAFADA. WAXAY DHIB KU QABAAN HELIDA BIYO KU FILAN OO NADIIF AH, DARYEELKA CAAFIMAADKUNA MA DHAMEYSTIRNA.

XIRIIRKA CAALAMIGA EE JIMCIYADAH LAANQEYRTA CAS IYO BISHA CAS, OO KA DAMBEEYAY MIDOWDA, LANA UNKAY 1919, WUXU XIRIIRIYAA HOWLAHA JAMCIYAD QARAMEEDYADA, WUXUAN KA CAAWIYAA SIDII AY UGU DIYAARGAROOSI LAHAAYEEN, UGA JAWAABCELIN LAHAAYEEN CUDURRADA FAafa IYO MASIIBOYINKA, HA AHAADAAN KUWO DABIICI AH AMA AADANE SAMEEYE.



CUDURKA AIDS-ka WUXU KU FIDAYAA...

... DUNIDA OO DHAN ...


.... WUXUNA BURBURINAYAA BULSHOYINKA OO IDIL.



NOLOSHU WAXAY HALIS UGU JIRTAA CUDURRO YAR YAR.



DIB UGA SOO LAABTA XEEBTA! DUFaanTA TSUNAMI AYAA SOO SOCOTEE!



URUR QARAMEEDYADU WAXAY XOOG BADAN GELIYAAN TABABARKA GARGAARKA DEG DEGGA AH.



XAALADDA DEGDEGGA AH, FICIL SAHLAN AYAA BADBAADIN KARA NOLOL.




DHAQDHAQAAQA CAALAMIGA EE LAANQEYRTA CAS IYO BISHA CAS AYAA RAACA MUDNAANO U HORSEEDA HELIDA KALSOONIDA IYO XURMADA DHAMAAN



DHEXDHEXADNIMADA WAA MABDA' MUHIIM AH WAAYO WAXAY DIIDEYSAA IN DHINAC LA RAACO ...


..... XUBNAHEEDA WAA IN AY GAARAAN QOF KASTA OO U BAAHAN.



DHAQDHAQAAQU WAA INUU MADAX-BANNAAN YAHAY SI UUSAN UGU HOGAANSAMIN RA'YIGA DADWEYNAHA IYO CADAADISKA SIYAASADEED.



INAAD EEXASHO LA'AAN AHAATO WAXAY KA DHIGAN TAHAY IN LA CAAWIYO QOF KASTA, IYADOO LAGA BILAABAYO KUWA AY BAAHI DOODU DEGDEGGA TAHAY.



IYADOO AAN LA SAMEYN TAKOOR KU SALEYSAN JINSI, DIIN, SIYAASAD AMA MAQAAM BULSHO.



IN LA XAQIJIYO IN GARGAARKA LA GAARSIYO DHAMAAN. DAL KASTA WAA INUU YEESHAA HAL URUR QARAMEED OO KELIYA.


IYADOO U FURAN DHAMAAN DADKA OO DHAN. JAMCIYAD QARAMEEDU WAXAY KA FOGAANEYSAA CAAWINTA HAL KOOX OO KELIYA.



MALAAIIN MUTADAWIIC AH, OO INTOODA BADANI DHALINYARO AH, AYAA KA DHIGAYA DHAQDHAQAAQA BANI'AADAMINIMO EE UGU WEYN ADDUUNKA. WAXAA HAGA DAMACA AH INAY YAREEYAAN DHIBAATADA KUWA U BAAHAN GARGAARKA.

URUR QARAMEEDYADA WAXAY LEEYIHIIN WAAJIBAAD AH IN AY IS CAAWIYAAN.

DHAQDHAQAAQA WUXUU UJEEDKIISU YAHAY INUU ILAALIYO NOLOSHA IYO CAAFIMAADKA, SI KOR LOOGU QAADO IXTIIRAAMKA SHAKHSIYAADKA, AY TAAGEERTO....



.... ISFAHAMKA, SAAXIIBTINIMADA, ISKAASHIGA IYO ADKEYNTA NABADGELYADA KA DHEX JIRTA DADKA.

DHAMAAD

DHAQDHAQAAQA WUXUU KA KOOBAN YAHAY ICRC, XIRIIRKA CAALAMIGA IYO 192 URURO QARAMEED (ABRIIL 2019).

